

Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 4aad	Cadadka: 9aad ee september	Taariikh: 04/10/2015
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p style="text-align: center;">1) Sooma bixin</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p style="text-align: center;">2) Cayimaada Xilliga Doorashooyinka Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-</p>	
--	--

xigeenka iyo Golaha Wakiiladda JSL 469

3) XEER MADAXWEYNE Lr:

0512/092015

Saamaxaad Madaxweyne

4) XEER MADAXWEYNE Lr:

0513/052015 Beddel

472

5) XEER MADAXWEYNE Lr:

0514/092015 Magacaabid

473

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,

WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

6) *Sooma bixin*

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

7) Amar Madaxbanaanayn dhul,
Maxkamada Gobolka Hargeysa

475

8) Amar Xayiraad Dhulka Dhaxalka ah ee
ay leeyihiin ilma X.nuux Cilmi,
Maxkamada Degmada Hargeysa

476

9) Wareegto ku saabsan kharashka
khidmada Garaacista Nuqulada,
Xukunada iyo Qaraarada Dacwadaha
Madaniga ah,
Maxkamada Sare JSL

479


10) Baafin Dacwaysane,
Maxkamada Degmada Hargeysa

482

11) Amar Xayiraad iyo Manfac keened kiro
Hantida ilma Maxamed Xasan Ibraahin,
Maxkamada Degmada Hargeysa

484

12) Diiwaan Gelin Shirikada Perfect Bridge



Engineering <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	485
13) Diiwaan Gelin Jaamacada Hargeisa International University <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	486
14) Diiwaan Gelin Shirikada ABC <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	488
15) Diiwaan Gelin Shirikada Somstaff and Management Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	489
16) Diiwaan Gelin Shirikada United Trading Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	491
17) Diiwaan Gelin Shirikada Awash Woldey General Contractor Company, <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	492
18) Diiwaan Gelin Shirikada Sahil Towage Services, <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	494
19) Diiwaan Gelin Shirikada Hubaal Constructors, Procurement and Logistics Management Company LTD, <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	496
20) Diiwaan Gelin Shirikada Caada Construction Company, <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	497
21) Diiwaan Gelin Shirikada Afri-Mahs Berbera for Trading <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	499
22) Diiwaan Gelin Shirikada Afri-Lis Dairies <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	501
23) Diiwaan Gelin Shirikada Miiran Pulps Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	502
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	
<i>Sooma bixin</i>	

QAYBTA LABAAD:



XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNaha:

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3569/092015

DATE....10/09/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0511/092015

Cayimaadda Xilliga Doorashooyinka Madaxweynaha, Madaxweyne Ku- xigeenka iyo Golaha Wakiillada JSL

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobada 42aad iyo 83aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Qoraalka Guddida Doorashooyinka
Qaranka ee summadiisu tahay
GDQ/XK/444/2015 ee ku
taariikhaysan 08/09/2015,
ujeeddadiisuna tahay Cayimaadda
Wakhtiga Doorashada Madaxtooyada

iyo Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland ee 28/03/2017.

Markuu Arkay:

Go'aanka Golaha Guurtida JSL ee lambarkiisu yahay GG/JSL/Go'aan Lambar 04/05/2015 kuna taariikhaysan 11/04/2015 ahna Go'aanka Muddo Kordhinta Xilka Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Goleyaasha Baarlamaanka (Wakiillada iyo Guurtida);

Markuu Arkay:

Faqaradda 3aad ee Qaraarka Fasiraadda ah ee Maxkamadda Dastuuriga Jamhuuriyadda Somaliland ee ay summadiisu tahay MS/DD/02/2015 kuna taariikhaysan 18/08/2015;

Markuu Ku Qancay:

In baahi loo qabo isla markaana ay lagama maarmaan u tahay hannanka dimuqraadiyadda iyo Doorashooyinka in la cayimo xilliga Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland;

Wuxuu Soo Saaray;

Xeerkan oo lagu go'aamiyey in taariikhdu markay tahay 28/03/2017 ay noqoto maalin doorasho oo ay qabsoonto Doorashada Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka iyo Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3572/092015

DATE....12/09/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0512/092015

Saamaxaad Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Xukunka Maxkamadda Gobolka Maroodijeex ee summadiisu tahay mgh/ddl/1269/2014, kuna taariikhaysan 10/03/2015 ee lagu xukumay danbiilayaasha hoos ku xusan midkiiba (1) sanno iyo (6) bilood oo xadhig ciqaabeed ah (ee halkan ku lifaaqan);

Markuu Tixgeliyey: Qoraalka Codsiga ah ee Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigalinta ee ay summadiisu tahay WWW/XW/19/05/2015 kuna taariikhaysan 30/05/2015 ee halkan ku lifaaqan;

Wuxuu Go'aamiyey

In laga bilaabo taariikhda maanta uu Saamaxaad u fidiyo:

1. Yoonis Faarax Cismaan Ina Sahra Cabdillahi 23 jir
2. Xamse Maxmed Xuseen Ina Hinda Maxamed 26 jir
3. Cabdillaahi Axmed Diiriye Ina Hinda Maxamed 26 jir

4. Aar Cabdoo Aadan Ina Yurub Axmed 23 jir

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3605/092015

DATE....21/09/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0513/052015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,
Xarafka (Kh) ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee
Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha
Qranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo in isku beddel lagu
sameeyo jagooyinkan hoos ku xusan;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidooda, aqoontooda iyo
hufnaantooda shaqo;

Markuu Ku Qancay: In ay hanan karaan xilalkan loo
magacaabay;

Wuxuu go'aansaday in laga bilaabo taariikhda Xeerkan

In Mudane, Abiib Axmed Cali, uu ahaado Agaasimaha Guud ee Waxbarashada ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.



In Mudane, Yuusuf Axmed Cali, uu ahaado Agaasimaha Guud ee Tacliinta Sare ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, Maxamed Xasan Ibraahin, uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, Saleebaan Jaamac Diiriye, uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3606/092015

DATE....21/09/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0514/092015

Magacaabid



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu ka Fiirsaday: kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdiraxmaan Maxamed Muxumed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL



JAMHUURIYAL SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEISA

REGIONAL COURT HARGEISA

MGH/DFL/03/2015

30/08/2015

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska m/mooge =Hargeysa=
Ku: - Guddomiyaha Degmada m/mooge =Hargeysa=
Ku: - Jara'idka Madax Banaan =Hargeysa=
OG: - Taliyaha Qaybta Booliska ee Bariga =Hargeysa=
OG: - Maayarka Caasimada (ahna Guddomiyaha
G/Deeganka) =Hargeysa=
OG: - loofuliye casha aadan taani =Hargeysa=
OG: - lagufuliye nuur cabdi yuusuf =Hargeysa=
OG: - Garyaqaanka Guud ee JSL =Hargeysa=

**Ujeedo: - Amar Madax Banaanayn Dhul Cabirkeedu
dhan yahay 24x24**

Maxkamda gobolka m/jeex.

Markay Aragtay: - Galdacwadeedka fulinta ah ee
sumadiisu tahay
MGH/DFL/22/2015

Markay Aragtay: - Arjiga codsiga madax banaaneynta
loofuliyaha eek u tarikhaysan
30/09/2015 kuna codsanayo in loo
madax banaaneeyo dhulka ku
yaaladagmadam/moogecabirkiisuna
yahay 24x4m jahooyinkiisnasidan
kalayahiin.

Waqooyi...Waddo galbeed...waddo
Koonfur...dhisme BariDhisme

Markay Aragtay: - Dhamaan Asbaabaha sare ku xusan
iyo qod kala ah 338 429 350 351
XHM waxaay maxakamadu soo
sartay madaxbanaanayntan

1. Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
30/09/2015 waxa ay maxkamdu u madax
banaanaysay loo fuliye caasha aadan taani dhulka
jihooyinkiida iyo cabirkeedaba sare ku xusan yahay
2. Waxa la faraya taliyaha Qaybta bariga in uu cidii
sharciga ka hor timaada maxakamada horkeeno
kana qado talaabo sharciga waafaqsan.
3. Laga bilaabo maanta 30/09/2015 in ay u madax
banaantahay dhulka sare ku xusan oo sifo kasta u
isticmaali karto, iibin karto, dhisan karto, rahmi
karto, sifo kasto oo sharci ah u isticmaali karto
4. Madax banaanytani waxa soo maanta oo ay
taariikhdu tahay 30/09/2015.

Alla Mahad Leh

Sh mubaarig cismaan awa Cali

Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA



Hargeisa District Court

قلمك حمل ا قىل حمل ا

MDH/J/DML/1273/2015

01/09/2015

Ku: - Idaacadda Radio Hargeysa

Ku: - Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku: - Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku: - Agaasimha Waaxda Dhulka ee Dawlada Hoose

Ku: - Taliyaha Qaybta Galbeedka Hargeysa

Ku: - Taliyaha Saldhiga IB/Koodbuur Ee Hargeysa

Ku: - Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku: - Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

Ku: - Xafiiska Nootayoyinka Hargeysa

Ku: - Garyaqaanka Guud Ee Qaranka J.S.L

**UJ: - Amar Xayiraad Dhulka Dhaxalka ah Ee ay
leeyihiin ilma X. Nuur Cilmi Cabirkiisuna yahay
48X72m**

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arijiga Codsiga ee uu
Maxkamadda u soo qortay

wakiilka dacwoodayaasha ee magaciisu yahay Maxamed X. Nuur Cilmi kuna codsanayo in loo xayiro Dhulka ah Ee uu ka tagay Aabohood Xaaji Nuur Cilmi oo ku yaala Degmada IB/Kood Buur Xaafada Jigjiga yar cabirkiisuna yahay 48X72M Jihoooyinkiisuna kala yihiin

Bari....waddo Galbeed ... Waddo

Waqooyi.....waddo Koonfur.....Waddo

Maxkamadu waxay u cuskatay xayiraadan Qod: 294 295. 296 XHM.

Asbaabta sare ku xusan iyo qodobada sharci ee sare ku xusan darteed waxay Maxkamadu laga bilaabo maanta 01/09/2015 xayiraad saartay Dhulka dhaxalka ah ku yaala Degmadda I/Kood buur ee ay leeyihiin ilma xaaji Nuur Cilmi in aan la iibin Karin la rahmi Karin la kirayn Karin la dhisi Karin sifo kalana loo badali Karin ilaa amar dambe ka soo baxayo Maxkamadda.

ALLAA

MAHAD

LEH

C/rashiid Maxamed Xirsi (Beer-geel)

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye sare: Khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADA SOMALILAND



MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

مك ح م ل ا ل ع ل ا

MS/GMS/G-7/218/2015

17/09/2015

Ku: Dhamaan Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha
Racfaanada Gobolada JSL

Ku: Dhamaan Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha
Gobolada JSL

Ku: Dhamaan Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha
Degmooyinka Gobolada JSL

Ku: Dhamaan Garsoorayaasha Maxkamadaha kala
Duwan Ee JSL

Ku: Isuduwaha Maxkamadaha Guur-Guura iyo
Nidaamka Maamulka iyo Maaraynta Dacwadaha

Ku: Guddi Baadhista Iyo Kormeerka Garsoorka Ee
Xafiiska Guddida Caddaalada JSL

Og: Xeer-Ilaaliyaha Guud Ee Qaranka JSL

Og: Hayada Shaqaalaha Dawlada JSL

Og: Wasaarada Caddaalada JSI

Og: Hayaada Xuquuqal Insaanka Qaranka JSL

Og: Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL

Og: Ururada Qareenada (SOLLA, SOWLA)

Iyo Xarumaha Kaalmaynta Adeega Sharciga Ee kuliyaada Sharciga Jaamacadaha Camuud Iyo Hargeisa



Og: Dadweynaha Ku Leh Dacwadaha Maxkamadaha Kala Duwan JSL

Og: Guddida Caddaalada JSL

Og: Madaxweynaha JSL

Ujeedo: Wareegto ku Saabsan Kharashka Khidmada

Garaacista Nuqulada, Xukunada iyo Qaraarada Dacwadaha Madaniga ah

Mudanayaal,

Sida aan la wada socono waxa beryahan danbe soo baxaayey cabashooyin dadweynaha ka imanaaya oo ku saabsan in laga qaado lacag aan xad lahayn marka ay dalbadaan “ **xukunada yeedhmooyinka, baafimaha, qaraarada**” iyo warqad kasta oo ay ugu baahdaan maxkamadaha. Arintaasina waxay keentay in dhaawac weyni soo gaadho karaamadii garsoorka iyo kalsoonidii ay dadweynahu ku qabeen maxkamadaha iyo nidaamka caddaalada.

Sidaas darteed waxa uu guddoomiyaha Maxkamadda Sare soo saaray wareegtadan:

- 1- In khidmada garaacista laga qaado xukunada ama qaraarada dacwadaha madaniga ah ama idaariga ah oo keliya.
- 2- in aan khidmada garaacista laga qaadi karin “**yeedhmooyinka, baafimaha, iyo wixii ka baxsan sida ku xusan qodobka 1aad**”

- 3- in aan khidmada garaacista laga qaadi karin xukunada dacwadaha ciqaabta ah.
- 4- Gudoomiyayaasha maxkamadaha kala duwan waxa la farayaa in ay Gacan kasiyaan in dhamaan xukunada maxkamadaha kala duwan lagu uruuriyo xafiiska kaaliyaha sare si uu ugu qaybiyo kaaliyayaasha maxkamadaha kala duwan.
- 5- Kaaliyaha sare e maxkamad kasta isagoo la kaashanaya guddoomiyaha maxkamada isagaa ka ma'suul ururinta xukunada, uqaybinta xukunada iyo ajuurada laga qaado garaacista xukunadaas kaaliyayaasha todobaadkiiba hal mar.
- 6- Kaaliyaha sare isagaa qabanaaya lacagta khidmada garaacista xukunada isaga oo isticmaalaya buuga qabashada lacagta **(Receipt Voucher)**, hal koobina siinaya muwaadinka uu ka qaaday lacagta koobiga kalena waxa uu ku hadhayaa buuga.
- 7- ma banana in kaaliye garaaco xukun aanu u dhiibin kaaliyaha sare.
- 8- in khidmada garaacista xukunadu tahay qiime aan ka badnayn **10,000 S/L Sh.** Bog Kasta.
- 9- In khidmada garaacista aan laga qaadi karin qof kasta oo fayl miskiin u furan yahay.
- 10- Isuduwaha maxkamadaha guur-guura waxa la farayaa in uu u qaybiyo dhaman maxkamadaha kala duwan buuga qabashada **(Receipt Voucher)** khidmada garaacista xukunada ay udiyaarisay maxkamada sare kuna tobobaro hadii loo baahdo.
- 11- Isuduwaha maxkamadaha guur-guura iyo Gudida baadhista iyo kormeerka garsoorka guddida caddaalada waxa si wada jir ah loo farayaa in ay dabagalaan dhaqangelinta wareegtadan, ciddii xadgudubyo ku samysana ay baadhis ka bacdi usoo gudbiyaan guddida caddaalada si looga qaado

tallaabo ku haboon oo waafaqsan Xeerka Nidaamka Asluubta iyo Anshaxmarinta Garsoorka,

Hadaba waxa la farayaa dhaman maamulada kala duwan ee maxkamadaha in ay si hawlkar ah uga hirgaliyaan maxkamadaha ay maamulan dhaqan galinta wareegtadan iyadoo si gaar ah loogula xisaabtami doono hirgalinta iyo kudhaqanka wareegtadan masuuliyiinta gacanta ku haya maamulada maxkamadaha

Amarkani waxa uu dhaqan gelayaa maalinta uu kasoo baxo xafiiska guddoomiyaha Aaxkamaddaha Sare JSL.

Proff. Adam Xaji Cali Axmed

Guddoomiyaha Maxkamada Sare ahna Gudoomiyaha Guddida Caddaalada JSL

JAMHUURIYADA  SOMALILAND

Maxkamadda Degmada Hargaysa

MDH/DML/J/1416/2015.

Date: - 22/09/2015.

Ku: - Idaacada Raadiyow Hargeisa.

Ku: Jaraa, idka Madaxa Banaan.

Ku: Garyaqaabka Guud Ee Qaranka

Ujeedo: - Baafin dacwaysane:- Kayse Nuur Dirir
(ismarooje)

Maxkamada Degmada Hargeisa waxay Baafinaysaa dacwaysanaha magaciisu sare ku xusan yahay in

uu ku yimaado maxkamada horteeda mudo 2 cisho gudohood oo ka bilaabmaysa marka laga baahiyo idaacada iyo warbaahinta madaxa banana ee dalka.



Dacwaysanaha oo dacwad madani ah u taalo Maxkamada Degmada Hargeysa.

Hadii uu ku imaan waayo mudada Maxkamadu u qabatay Dacwaysanaha Maxkamadu waxay dhageysan doontaa dacwada isagoo maqan sida waa faqsan qodobka 204 XHM, Taalooboyin sharciga waafaqsan waa laga qaadi doona.

Maxkamadu waxay u cuskatay baafintan Qodobka 121 XHM.

Allaah Mahad Leh

(Saleeban Jaamac Xandule)

Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa

Sacad Maxamuud Xirsi

Kaaliyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA

Hargaysa District court

المحكمة المحلية

MDH/DML/ 1408 /2014

05 / 05 /14

Ku:- Idaacadda Radio Hargeysa
Ku:- Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan
Ku:- Xafiska Garyaqaanka Guud
Ku:- Taliyaha Saldhiga G/libaax
Ku :- Dhamaan Kiristayaasha Hantida Ilma Maxamed Xasan Ibraahin
Ku:- Taliyaha Saldhiga Dhexe Ee Hargaysa
Og :-Maayirka Dawlada Hoose
Og :- Maayir Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa
Og :- Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

UJ:- Amar Xayiraad Iyo Manfac keenid Kiro Hantida Ilma
Maxamed Xasan Ibraahin Hantidaas Oo dhan 9aal guri iyo dhulka
banaan ee kiraysan

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga ah Ee uu Maxkamadda u soo Qarteen Dacwoodayaal ilma
Maxamed Xasan Kuna Codsanayaan in loo Xayiro Hantida dhaxalka ah
Ee uu ka tagay Aabahood Maxamed Xasan Ibraahin Manfaacedana
Maxkamada La keeno Guryahan dhaxalka ah Ee ku yaala Degmada
G/libaax

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Xayiraadan Qod: 294 295. 296 XHM.

Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobada sharci Ee sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu
laga bilaabo maanta 30/09/2015 Xayiraad Saartay Guryaha dhaxalka ah ku yaala Degmadda
Gacan libaax Ee uu ka tagay Marxuum Maxamed Xasan Ibraahin in aan la iibin Karin la rahmi
Karin la dhisi Karin sifo kalana loo badali Karin,Manfacana Kiraystayaashu Maxkamada
Dgmada Hargaysa waa inay Keenan Ilaa amar danbe maxkamadda ka soo baxayo si aanay
dhan kaliya ugu tasarufin hantidan inta lagu kala Baxaayo Dacwadan Dhaxalka ah Ee
Maxkamada u taala

ALLLAA MAHAD LEH

C/rashiid Maxamed Xirsi (Beer Geel)

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye :- Hodan Cabdalle Barre

ADDRESS / EMAIL: xafiska@gmail.com TEL: +25263- 4100390 / +242263 4438816
HARGEISA – SOMALILAND

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL



XIG/JSL/168/2015.

12/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay PERFECT BRIDE ENGINEERING, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay PERFECT BRIDE ENGINEERING, Astaanteeduna tahay: - (Sawir Biriij), shaqadeeduna tahay Soo Genenaral Trading (General Trade), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 12/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL

XIG/JSL/171/2015.


13/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Jaamacadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta.



Markuu arkay: - Warqada ka soo Baxday Xafiiska Gudida Qaranka ee Tacliinta Sare ee Somaliland Sumadeedu tahay GQTS/CEO/0142/March 2015 ee 30/03/2015.

Markuu arkay: - Warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Waxbarashada ee ku taariikheysa 15 03/2015 ee ay ku ogolaatay Jaamacadda Hargeisa International University.

Markuu Arkay: - Warqadda ka soo baxday Wasaaradda Ganacsiga ee ay ku ogolaatay Diiwan galinta Jaamacadda Hageisa International University.

WUXUU CADDEYNAYAA.

In xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan yahay Jaamacadda magaceedu yahay HARGEISA INTERNATIONAL UNIVERSITY, xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa.

Allaa Mahad Leh.


(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL



XIG/JSL/174/2015.

16/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay:- Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ABC.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, ABC, Astaanteeduna tahay:- (xarfaha ABC oo ku dhex jira Map-ka aduunka), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyadda (Logistics & Procurement), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE
QARANKA JSL

XIG/JSL/175/2015.

16/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u

siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOMSTAFF & MANAGEMENT COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay SOMSTAFF & MANAGEMENT COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkadda), shaqadeeduna tahay Bixinta adeegyadda (Logistics & Procurement), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/09/2015

Allaa Mahad Leh.


(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL



XIG/JSL/176/2015.

17/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay UNITED TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay UNITED TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha UTC), shaqadeeduna tahay ganacsiga guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Burco, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL

XIG/JSL/177/2015.

17/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AWASH WOLDEY GENERAL CONSTRUCTOR COMPANY.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay AWASH WOLDEY GENERAL CONSTRUCTOR COMAPNY, Astaanteeduna tahay: - (dhismayaal), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE
QARANKA JSL

XIG/JSL/178/2015.

20/09/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SAHIL TOWAGE SERVICES oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad

qodobka 11aad (2) (a) Somaliland
Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu
waafaqsan yihiin Xeerka
Shirkadaha Xeer NO.25/2004
Company Act of Somaliland,
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay SAHIL TOWAGE
SERVICES, Astaanteeduna tahay: - (Magaca
Shirkada), shaqadeeduna tahay adeega (Logistics
Serices), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa,
laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
20/09/2015

Allaa Mahad Leh.


(Aadan Axmed Muuse)

Ku simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL



XIG/JSL/179/2015.

20/09/2015

Ku: Cidda Ay Khuseyso

Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HUBAAL CONTRACTORS, PROCUREMENT AND LOGISTICS MANAGEMENT COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004

Company Act of Somaliland,
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay, HUBAAL
CONTRACTORS, PROCUREMENT AND LOGISTICS
MANAGEMENT COMPANY LTD, Astaanteeduna
tahay: - (muuqaalka aduunka oo ay dhex marsan
tahay laba xariijimood oo soo xoodan, midabkoodu
yahay bulug), shaqadeeduna tahay Bixinta
Adeegyadda (Procurement and Logistics),
xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga
bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE
QARANKA JSL

XIG/JSL/180/2015.

21/09/2015

Ku: Cidda Ay Khuseyso

Hargeysa.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, CAADA CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, CAADA CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Dube Nijaar), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay (Procurement and Logistics), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL

XIG/JSL/181/2015.

22/09/2015

Ku: Cidda Ay Khuseyso


Hargeysa.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u

siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AFRI-MAHS BERBERA FOR TRADING

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, AFRI-MAHS BERBERA FOR TRADING, Astaanteeduna tahay:- (AFRI), shaqadeeduna tahay ganacsi Guud (General Trade), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/09/2015

Allaa Mahad Leh.


(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE

QARANKA JSL



XIG/JSL/182/2015.

22/09/2015

Ku: Cidda Ay Khuseyso

Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **LIS DAIRIES.**

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, AFRI-LIS DAIRIES, Astaanteeduna tahay:- (Xarfaha LIS), shaqadeeduna tahay Soo saarista caanaha iyo casiirka (Milk & Juice), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/09/2015

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE
QARANKA JSL

XIG/JSL/183/2015.

22/09/2015

Ku: Cidda Ay Khuseyso

Hargeysa.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta

Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay:- Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MIIRAN PULPS COMPANY.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, AFRI-MIIRAN PULPS COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Miiran), shaqadeeduna tahay Wershadeynta khudaarta dabiiciga ah (Producing Fruits Pulp), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/09/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka